Codsashada Qaabilaadda Naafanimada

Si aad caawimo u hesho maxkamadda markaad naafo tahay, sii waydiiso wakhti aad uga horreeya taariikhda maxkamadda lagaa rabo. Si aad u waydiisato:

- Isticmaal foomka "Codsiga Qaabilaadda", markay suurtogal tahay;
  - Waxaad ka heli kartaa foomka karraani ama websaytka Laanta Garsoorka oo ah www.courts.maine.gov/ada.
    U dhiib foomka karraaniga ama iimeyl ugu dir accessibility@courts.maine.gov ama boosta ku dir oo ku hagaaji Xafiiska Adeegsiga Maxkamadda (Court Access Office).
- Iimeyl ugu dir accessibility@courts.maine.gov; ama
- Ka wac Xafiiska Adeegsiga Maxkamadda 207-822-0718 (Adeegga Taleefanka Gudbinta Maine 711).

Markaad codsanayso caawimo inaad naafo tahay darteed, ku dar:

- Inaad naafo tahay iyo nooca naafada;
- taariikhdaada maxkamadda iyo halka ay ku taalo maxkamadda kiiskaaga qaadaysaa;
- caawimada aad u baahan tahay waxay tahay; iyo
- sababta aad caawimadaas ugu baahan tahay.

Ha u dirin wax diiwaano caafimaad ama dokumentiyo caafimaad ah maxkamadda ilaa lagu waydiisto.

Waxa lagaa codsan macluumaadka caafimaad kaliya haddii loogu baahdo go'aaminta qaabilaado macquul ah. Wixii macluumaad caafimaad ee la bixiyo waxa lagu ilaalin qarsoodi waxaana kaliya loo wadaagi sidii loogu baahdo si loo qaato go'aan qaabilaad ama sidii sharcigu dhigayo.

Xayawaanka Maxkamadda lala soo Galayo

Xayawaanka adeega waa laga oggol yahay maxkamadaha gobolka Maine. Xayawaanka adeega wuxuu noqon karaa ey, ama baqal, loo tabobaray inay shaqo u qabato/qabto ama u qabato hawlo gaar ah qof naafo ah. Xayawaanka la rabbaysto lama oggola in lagu haysto guriga maxkamadda. Eyda bixinaya dejin, dabiib, ama taageero niyadeed ma aha xayawaan adeeg qabta oo ay ADA dhigayso in la oggolaado, sababtuna waxa weeye looma tabobarin inay u qabtaan shaqo ama hawlo gaar ah qof naafo ah. Eyda dejinta, dabiibka, iyo taageerada niyadeed waxa la oggolaan doonaa inay soo galaan guriga maxkamadda kaliya iyagoo ah qaabilaad ahaan haddii hore loo sii codsaday iyadoo lala xiriiriyo Xafiiska Adeegsiga Maxkamadda ama Maxkamadda iyo marka xaakinku oggolaado.

Adeegga Xeerbeegtida ee Dadka Naafada ah

Dadka naafada ah waxa lagu dhiirigaliyaa inay ka qaybqaataan adeegga xeerbeegtida oo, maadaama uu adeegga xeerbeegtidu muhiim u yahay nidaamkeena caddaaladda, si otomaatig ah loogama cudurdaarto adeegga xeerbeegtida.

Qof naafo ah oo loola soo xiriiro adeegga xeerbeegtidu wuxuu codsan karaa qaabilaad macquul ah isagoo u qoraya codsigiisa su'aalaha u qalmidda xeerbeegtida ama foomka codsiga qaabilaadda naafada, isagoo wacaya xafiiska karraaniga, ama la xiriiraya Xafiiska Adeegsiga Maxkamadda.

Qof naafo ah wuxuu codsan karaa inuu ka cudurdaarto adeegga isagoo la xiriiraya xafiiska karraaniga oo bixinaya qoraalka dhakhtarka ama dokumentiyo kale oo caddayn ah oo uu ka helay bixiye caafimaad si looga cudurdaaro adeegga xeerbeegtiga.

La xiriir

Xafiiska Maamul ee Maxkamadaha
Court Access Office
P.O. Box 4820, Portland, ME 04112-0792
accessibility@courts.maine.gov
(207) 822-0718 ama Adeegga Taleefanka Gudbinta Maine 711

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan qaabilaadaha dadka naafada ah, booqo www.courts.maine.gov/ada

Adeegyada Maxkamadda ee Dadka Naafada ah: Sida Qaabilaado loo Codsado

www.courts.maine.gov

Maxkamadaha Gobolka Maine iyo ADA

Maxkamadaha gobolka Maine waxay xushmeeyaan xuquuqdaada sida ay dhigayaan Xeerka Ameerikaanka Naafada ah (Americans with Disabilities Act, ADA) iyo Xeerka Xuquuqda Aadanaha Maine (Maine Human Rights Acts, MHRA). Maxkamad kasta waxay leedahay baarkin la adeegsan karo, dariiqyo, qolal maxkamadeed, iyo musqulo loogu talogalay dadka isticmaalaya aaladaha qofku ku dhaqdhaqaaqo sida tukubayaasha, kursi-curyaanada la riixo, iyo kursicuryaanada mashiinka ah.

Laanta Caddaaladda Maine sidoo kale waxay kaalmayn doontaa dadka naafada ah si ay markaa u soo gali karaan, una isticmaali karaan maxkamadda si wax-ku-ool ah oo macne leh. Maxkamaduhu waxay ugu qabanqaabin kaalmooyinka iyo adeegyada bilaa lacag dadka naafada ah si ay markaa galaangal ugu yeelan karaan dhacdooyinka maxkamadda. Maxkamaduhu sidoo kale waxay wax-ka-beddel ku samayn shaqooyinka maxkamadda, si sabab leh, si ay u caawiyaan qofka naafada ah. Caawimadan sidoo kale waxa loo yaqaan "qaabilaad macquul ah" ama "qaabilaadda naafada."

Ayaa Heli Kara Qaabilaadaha Naafada?

Maxkamaddu waxay u qabanqaabin kartaa kaalmooyin ama adeegyo ama waxay wax uga beddeli kartaa shaqooyinka maxkamadda qofka qaba **naafo jireed ama maskaxeed taasi oo si aad ah u xadidda mid ama ka badan hawlihiisa nolosha ee muhiimka ah, sida socodka, aragga, maqalka, ama hadalka.**

Adeegsiga Tasiilaadka Maxkamadda

Maxkamaddu waxay ballanqaaddaa adeegsiga baarkinka, irridaha, qolalka, iyo musqulaha maxkamadda. Fadlan kala xiriir karraaniga ama Xafiiska Adeegsiga Maxkamadda accessibility@courts.maine.gov ama 207-822-0718 (Adeegga Taleefanka Gudbinta Maine 711) haddaad qabto su'aalo ku saabsan imaanshaha maxkamadda si fool ka fool ah.

Haddaad rumaysan tahay inaadan awoodin inaad timaad maxkamadda **si fool ka fool ah** naafada aad qabto darteed, waxaad maxkamadda waydiisan kartaa inaad Zoom ama taleefan adeegsato. Si aad tan u samayso waxaad u baahan tahay inaad buuxiso foomka Motion for Alternative Format for Court Proceeding (MJB form CR-CV-FM-260), aad siiso nuqul ah foomka aad buuxisay dhinacyada kale ee kiiskaaga, oo aad u gudbiso karraaniga (si fool ka fool ah ama boostada) **kahor** taariikhda dhacdadaada maxkamadda.

Haddaad rumaysan tahay inaadan awoodin inaad timaad maxkamadda **taariikhdaada maxkamadda**, sababtu waxay rabto ha noqotee oo ay sababo caafimaad ku jiraan, waxaad ka codsan kartaa maxkamadda inay dib kuugu dhigaan ballanta. Si aad tan u samayso waxaad u baahan tahay inaad buuxiso foomka Motion to Continue (MJB form CR-CV-FM-JV-PA-PC-286), aad siiso nuqul ah foomka aad buuxisay dhinacyada kale ee kiiskaaga, oo aad u gudbiso karraaniga (si fool ka fool ah ama boostada) kahor taariikhda dhacdadaada maxkamadda.

Foomamka waxaad ka heli kartaa websaytka Laanta Caddaaladda Maine ama xafiiska karraaniga.

Qalabka Caawinta iyo Adeegyada

Qalabka caawinta iyo adeegyada loogu talogalay maxkamadda waxa ku jiri kara:

Aaladaha kaa caawinaya inaad wax maqasho, ee loo yaqaan "dhagaysiga la kaalmeeyey"—fadlan waydii karraani ama maarshaal wax ku saabsan adeegsiga adeegyadan markaad soo gasho;

Foormaatyada sida farta waawayn, Farta Dadka Aragga Beelay, dhijitaal, ama cod;

Qoraal u rogid dhacdooyinka maxkamadda, iyadoo la isticmaalayo Computer Access Real-time Translation (CART) ama closed captioning [CC];

Tarjumaanada luuqadda calaamadaha; iyo

Oggolaanshaha isticmaalidda qofka taageerada shakhsi ahaaneed.

Caawimada Aad Ku Heli Karto Maxkamaddu Intay Leeg tahay

Maxkamaduhu waxay bixin doonaan qaabilaado macquul ah waxayna ku samayn wax-ka-beddelo macquul ah adeegyadooda, laakiin sharcigu ma **dhigayo** Laanta Caddaaladdu inay ku kacdo wax:

- Beddelaya dabciga adeegyada maxkamadda;
- qiime aad u sarreeya ku kacaya;
- ay adag tahay in la meelmariyo, ama aan la meelmarin karin; ama
- beddelaya waxa sharcigu ka qabo kiis.

Xataa dadka naafada ah, maxkamaduhu:

- **Ma** laha adeegyada garyaqaanka, ma qabtaan cilmibaaris sharci, ma bixiyaan talo sharci, ama ma bixiyaan fasiraad sharci;
- **ma** laha kursi-curyaano, qalabka caawiya maqalka, iyo muraayadaha indhaha ama qalabyada kale ee shakhsi ahaaneed;
- **iskuma** geegeeyaan kursi-curyaanada furfuran, ma caawiyaan riixista kursi-curyaanada, ma habayn karaan qalabka caawiya maqalka ee shakhsi ahaaneed, oo ma bixin karaan daryeelka adeegaha shakhsi ahaaneed ee kale;
- **ma** bixiyaan gaadiid lagu tago ama lagaga tago maxkamadda ama adeegyada shakhsi ahaaneed ee kale;
- **ma** akhriyayaal loogu talogalay isticmaalka ama daraasaynta shakhsi ahaaneed;
- **dib uma dhigi karaan** taariikh dhacdo maxkamadeed, oo looga codsanayo "dib u dhig" wax ka badan halmar haddaysan jirin sabab **khasbaysa** oo la caddayn karo; iyo
- **ma kordhin karto** taariikhaha kama dambaysta ah ee sharcigu dhigo.